# WARBIXINTA SEDDEX BILOODLAHA EE GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LA SOCODKA HIRGALINTA DASTUURKA

BARLAMAANKA FEDDERAALKA SOOMAALIYA

MAARSO, 2019

MUQDISHO

Tusmada

1.0. Hordhac ..... 2
2.0. Howlihii u qabsoomay Guddiga ..... 3
2.1. Soo bandhigidda iyo Ansixinta Qorshaha-Farsamo ee Tabta Dib u eegista Dastuurka ..... 3
2.2. La tashiga Qorshaha Dib-u-eegista Dastuurka. ..... 4
2.3. Asaasidda Madashada Guddiyada Dastuurka ..... 4
2.4. Shirweynaha Qaran ee Daahfurka Dib-u-Eegista Dastuurka ..... 5
2.5. Diyaarinta Cutubyada 1aad ilaa 5aad/12aad ..... 6
2.5.1. Tallaabooyinkii loo maray dib-u-eegista 5ta Cutub ..... 6
2.5.2. Natiijooyinka Soojeedinta Wax-ka beddelka 5ta cutub ee Dastuurka ..... 7
2.6. Soo-bandhigidda Warbixinta Soo-jeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka Guddiyada Joogtada ah ee labada Aqal. ..... 9
2.7. Daahfurka La tashiga Soojeedinta Waxkabaddelka Dastuurka. ..... 10
2.8. Diyaarinta Cutubyada 6aad ilaa 9aad ..... 10
2.8.1. Natiijooyinka Soojeedinta Wax-ka beddelka cutubyada 6-9aad ..... 11
2.8.2. Khulaasada Wax-ka beddelka cutubyada 6-9aad ..... 12
2.9. Diyaarinta Cutubyada 10aad, 11aad,13aa,14aad iyo 15aad ..... 13
2.10. Diyaarinta Habraaca Ansixinta Cutubyada Dib-u-eegista Dastuurka. ..... 13
2.11. Hawl-wadeenada Cusub iyo La taliyeyaal ee Guddiga ..... 13
3.0. Korjoogteynta iyo Isku-dubaridka Geedi Socodka. ..... 13
3.1. Kulamo Seddex Geesood ah ..... 13
4.0. La tashiyada ..... 14
- Dhalinyarada Soomaaliyeed: Guddigu wuxuu u qabtay dood-madalleed, kulamo kala duwan dhalinyara ku nool magaalooyinka Muqdisho, Garowe iyo Baydhabo. ..... 15
- Bulshada Rayidka: Guddiga wuxuu la qaatay kulama kala duwan hay'adaha Bulshada Rayidka ee magaalooyinka Muqdisho, Garowe, Baydhabo iyo Jowhar. ..... 15
- Culumada Soomaaliyeed ee ku nool Muqdisho. ..... 15
- Dadka Baahiyaha Gaarka ah leh ee ku nool Muqdisho. ..... 15
- Kutlada Haweenka Golaha Aqalka Sare. ..... 15
- Madaxda Dawlad Goboleedyada iyo Wasiirada Arrimaha Dastuurada: ..... 15
5.0. Qorshaha Guddiga ..... 15
Guddiga la socodka oo si dar-dar leh kuwada howsha dib-u-eegista Dastuurka ayaa qorshayaashiisa dhow waxaa ka mid ah kuwan soo socda: ..... 15
- La tashiga Dowlad-Gobleedyada iyo dadweynaha ee 10 ka dib-u-eegista lagu sameeyey. ..... 15

- La tashiyada Guddiyada laba Aqal ee BFS. ..... 15
- Wacyi-gelinta Dadweynaha ee la xiriirta Dib-u-eegista Dastuurka. ..... 15
- Ugudbinta iyo ka-doodista 10ka Cutub ee dib-u-eegista Dastuurka, BFS. ..... 15
- Dhamaystirka cutubyada 10aad,11aad,13aad,14aad iyo 15aad. ..... 15
- Dabagalka arrimaha u baahan wadaxaajoodka siyaasadeed ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Xukuumadaha Dawladda Goboleedyada. ..... 15
- Korjoogteynta iyo Isku-dubaridka hay'adaha la xiriira Geedi-socodka Dib-u-eegista Dastuurka heer Federaal iyo heer-dawlod-goboleed. ..... 15

6.0. Caqabadaha Jira ..... 15

6.1. Ergada Dawlad-goboleedyada ee ku biiri lahaa GMDHD: ..... 15

6.2. Khilaafaadkii Dawlad Goboleedyada iyo Dawladda Dhexe ..... 16

Geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka waxaa saameyn ku yeeshay khilaafka soo kala dhex-galay dawladda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyada, ayadoo dib-u- dhac ku yimid dib-u-eegista Dastuurka. ..... 16

6.3. Ayadoo aan wali lasoo dhamaystirin qaar kamid ah Qodobadii wadaxaajoodka (Qodobka 54aad iyo 122aad ) uga baahnaa Xukuumadda FS iyo xukuumadaha DXFS oo wali heshiis aan laga gaarin, taas oo dib u dhac ku keentay dib-u-eegista Dastuurka. ..... 16

6.4. Caqabadaha dhanka Miisaaniyadii Qaranka ee 2018 iyo 2019 loo qoondeeyey dib u eegista Dastuurka oo aan loo helin sidii loogu talo-galay. ..... 16

7.0. Talo-soo-jeedinta Guddiga ..... 16

8.0. Gabagabo ..... 16

9.0. Lifaaqyada Warbixinta ..... 17

## 1.0. Hordhac

Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Hirgalinta Dastuurka wuxuu warbixintan u diyaariyey Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si loogu wargaliyo waxyaabihii u qabsoomay Guddiga, caqabaha lala kulmay iyo hawlaha u qorsheysan Guddiga.

Si geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka loo dar-dargaliyo, Guddigu wuxuu qabtay hawlo badan oo ay ka mid yihiin diyaarinta Qorshe-hawleedka Geedi-socodka Dib-u-eegista Dastuurka oo qeexaya dhammaan hawlaha la xiriira dib-u-eegista Dastuurka, waxaana qayb ka ahaa diyaarinta qorshe-hawleedka Wasaaradda Arrimaha Dastuurka iyo Guddiga Madaxabannaan ee dib-u-Eegista iyo Hirgalinta Dastuurka. Sidoo kale, Guddigu wuxuu diyaariyey Qorshe Farsamo oo qeexaya tabta loo marayo Geedi-socodka Dib-u-eegista Dastuurka, wuxuuna meel mariyey oo

ansixiyey 10 cutub oo ka mid ah Dastuurka KMG ah oo ah: 1aad, 2aad, 3aad, 4aad, 5aad/12aad,6aad, 7aad, 8aad iyo 9aad oo uu soo diyaariyey Guddiga Madaxabannaan ee dib-u-Eegista iyo Hirgalinta Dastuurka, waxaa kaloo loo diray GMDHD diyaarinta cutubyada 10aad,11aad,13aad,14aad iyo 15aad ee Dastuurka KMG ah oo hadda gabo-gabo mareysa.

## 2.0. Howlihii u qabsoomay Guddiga

### 2.1. Soo bandhigidda iyo Ansixinta Qorshaha-Farsamo ee Tabta Dib u eegista Dastuurka

Si waafaqsan Qodobka 133aad Faqradda 6(e) ee Dastuurka, Guddiga La-socodka wuxuu diyaariyey Qorshe Farsamo oo qeexaya tabta, dib-u-eegista Dastuurka iyo dhammaan tallaabooyinka iyo habka Geedi-socodka Wax-ka-beddelka Dastuurka. Wuxuu kaloo tilmaamaya qaabka cutubyada loo kala hormarinayo dib u eegistooda, qaabka wadatashiyada iyo cidda lala tashanayo inta aan loo gudbin Barlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Guddigu wuxuu u kala qaybiyey 15ka cutub ee Dastuurka KMG ah saddex qaybood oo kala ah:

1. Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad, 4aad iyo 5aad/12aad
2. Cutubyada 6aad, 7aad, 8aad iyo 9aad
3. Cutubyada 10aad, 11aad, 13aad, 14aad iyo 15aad.

Sidoo kale, Guddigu wuxuu u maray dib-u-eegista cutubyada dastuurka tabta ku qeexan qaraarkii Baarlamaankii 9aad ee 2015 oo ah sida soo socota:

1. Qodobo Farsamo oo u baahan in laga eego luuqadda, qaladaadka qoraalka, IWM.
2. Qodobo u baahan Kabid, ku daris ama ka dhimis.
3. Qodobo u baahan wadaxaajood siyaasadeed iney ka yeeshaan Xukuumadda Federaalka Soomaliya iyo Xukuumadaha Dowladaha Xubnaha ka ah DF.

Dib-u-eegista cutubyada Dastuurka waxaa lagama-maarmaan ah in la sameeyo la tashiyo golayaasha Baarlamaanada heer Federaal iyo heer Dawlad-goboleedba iyo bulshada rayidka intaan loo gudbin Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Sidoo kale waxaa muhiiim ah in la sameynayo wacyi-gelin dadweyne ee ku aadan soojeedinta waxka-beddelka Dastuurka.

### 2.2. La tashiga Qorshaha Dib-u-eegista Dastuurka.

Guddiga La socodka, GMDHD iyo Wasaraada Arrimaha Dastuurka waxay latashiyo la sameeyeen Dawlad Goboleedyada iyo Bulshada rayidka si loo xaqiijiyo mabaadi'da lahaashaha si uu Dastuurka u noqdo mid Soomaali leedahay, Soomaalina hogaamineyso. Sidoo kale, Guddigu wuxuu kala tashaday Gudoonnada labada Aqal ee BFS, wuxuuna ka ansixiyey Guddiyada Joogtada ah ee labada Aqal Qorshaha-Farsamo ee Dib-u-Eegista Dastuurka.



### 2.3. Asaasidda Madashada Guddiyada Dastuurka

Si loo dardargeliyo hawlaha dib-u-eegista Dastuurka, Guddiga La socodku wuxuu aas-aasay April 2018 Madasaha Guddiyada Dastuurka oo ka kooban Guddiga La Socodka, Guddiga Madaxabannaan iyo Guddiyada Dastuurada ee Puntland, Koonfur Galbeed, Hirshabelle, Jubbaland iyo Galmudug.




Madasha Guddiyada Dastuurka waxaa loo yagleelay in Guddiyada Dastuurka ee heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed ay yeeshaan xiriir iskaashi iyo wada shaqeyn, sidoo kale dardargelinta dhamaystirka iyo qabyo-tirka Dastuurka KMG ah.

## 2.4. Shirweynaha Qaran ee Daahfurka Dib-u-Eegista Dastuurka

Guddiga La Socodka, Wasaaradda Arrimaha Dastuurka Iyo Guddiga Madaxabanaan ee dib-u-Eegista iyo Hirgalinta Dastuuka waxay si wada jir ah u qabteen 13-15 May 2018, Shirweyne Qaran ee lagu daah-furay wajiga labaad ee Hannaanka dib-u-eegista Dastuurka. Shirkaan oo ay ka soo qayb-galeen dhammaan Hay'adaha iyo talo-wadaagyada doorka muhiimka ah ku leh Geedi socodka Dib-u-eegista Dastuurka oo ay ka mid yihiin Xukuumada Federaalka, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Dowladaha xubnaha ka ah JFS iyo qaybaha kala duwan ee bulshada, waxaa si rasmi ah u daah-furay wajiga 2aad ee Hannaanka dib-u-eegista Dastuurka Guddoomiyaha Golaha Shacabka Maxamed Mursal Sheekh Cabdiraxmaan ahaana Ku-simaha Madaxaweynaha JFS.









## 2.5. Diyaarinta Cutubyada 1aad ilaa 5aad/12aad



Guddiga La Socodku wuxuu u diray 18 May, 2018 Guddiga Madaxabanaan ee dib-u-eegista iyo hirgalinta Dastuurka diyaarinta cutubyada 1aad ilaa 5aad si dib-u-eegis ugu sameeyaan ayadoo loo maray habka ku xusan warbixintaan. Isla taariikhdaas Guddigu wuxuu u direy Wasaaradda Arrimaha Dastuurka inay fududeyso Arrimaha u baahan wadaxaajoodka ee ku jira cutubyadan gaar ahaan Qodobada 44 iyo 54 ee Dastuurka KMG ah.

Guddiga Madaxabanaan wuxuu u soo gudbiyey 6 Juun, 2018 Guddiga La socodka 5tii cutub ee dib-u-eegista lagu sameeyey, Guddiga La socodkuna wuu ansixiyey, kadib markii tilmaamo iyo sixid uu ku sameeyey.


### 2.5.1. Tallaabooyinkii loo maray dib-u-eegista 5ta Cutub

- December 6, 2017 Guddigu si rasmi wuxuu ula wadaagay Madaxda Qaranka iyo kuwo Dawlad Goboleedyada Arrimaha u baahan Wadaxaajoodka siyaasadeed gaar ahaan Qodobada 44, 54, iyo 122 si ay heshiis uga gaaraan uguna soo gudbiyaan Guddiga La-socodka.
- 18 May 2018, maalmo ka dib Shirweynihii Daahfurka waxaa uu Guddiga u direy Guddiga Madaxbannaan inay dib-u-eegis ku soo sameeyaan Cutubyada 1aad ilaa 5aad**.** Eeg lifaaq.
- Isla taariikhdaas Guddigu wuxuu u direy Wasaaradda Arrimaha Dastuurka inay fududeyso Arrimaha u baahan wadaxaajoodka ee ku jira cutubyadan gaar ahaan Qodobada 44 iyo 54 ee Dastuurka KMG ah. Eeg lifaaq**.**
- 9 Juun 2018 Wasaaradda Arrimaha Dastuurka ayaa Guddiga soo gaarsiisey Heshiiskii Madaxda Qaranka iyo kuwa Dawlad Gobleedyada ee Nooca Doorashada 2020 iyo Qaybsiga Dakhliga Kheyraadka ay ku gaareen Baydhabo 3-5 Juun 2018. Wasaaradda Arrimaha Dastuurka waxayna ilaa hadda ku guulaysan inay fududayso heshiis ay ka gaaraan Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Xukuumadaha Dawlad-Goboleedyada Qodobka 54aad ee Dastuurka KMG ah.
- 11 Julay 2018 Guddiga Madaxbannaan ayaa u soo gudbiyey Guddiga Soojeedimaha ay ka soo sameeyeen Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad, 4aad iyo 5aad & 12aad.
- Guddiga La-socodka, 12 ilaa 27 Julaay, waxay ka diyaariyeen faallooyin soojeedinta wax-ka-beddelka Dastuurka.
- Guddigu La Socodku wuxuu kulamo isdaba jog ah la qaatey guddiga Madaxabannaan ee dib-u-eegista dastuurka, wuxuuna ansixyey soojeedinta ay soo gudbiyeen Guddiga Madaxabannaan.


### 2.5.2. Natiijooyinka Soojeedinta Wax-ka beddelka 5ta cutub ee Dastuurka

Shaxdaan hoos ku muujisan waxay tilmaamaysaa soojeedinta Wax-ka baeddelka cutub kasta oo kamid ah 5ta Cutub ee Dastuurka. Wax-ka-beddelka lagu sameeyey cutub kasta wuxuu noqon karaa: faqrad ama qodob cusub/kordhin, tirtirid, wax-ka-beddel farsamo, qodob/faqrad laga gaaray wada-xaajood siyaasadeed.


**Cutubka 1aad**: Shaxda cutubka 1aad waxaa ay tilmaameysaa waxyaabaha laga bedeley cutubka. Cutubka oo ka kooban ilaa sagaal qodob ayaa intooda badan farsamo ahaan dib loo eegey. Qodobka 9aad ee Maqaamka Caasimadda waxaa laga diyaariyey saddex xulasho. Cutubka waxaa lagu soo kordhiyey shan farqadood ayadoo la tirtirey laba faqradood. Ma jiraan qodobo wadaxaajood laga galey.





**Cutubka 2aad:** Waxaa lagu soo kordhiyey ilaa 16 faqradood waxaana la tirtirey 4 faqradood. Hal qodob ayaan waxba laga bedelin ayadoo 22 qodob lagu sameeyey wax ka beddel farsamo.



**Cutubka 3aad**: Cutubkan waxaa lagu soo kordhiyey laba faqradood waxaana la tirtirey laba faqradood oo kale ayadoo wada hadal siyaasadeed laga galey hal qodob guud ahaana waxaa wax ka bedel farsamo lagu sameeyey laba qodob.





**Cutubka 4aad**: Waxaa lagu soo kordhiyey hal qodob iyo afar faqradood ayadoo laba qodob farsamo ahaan wax looga bedeley.




**Cutubka 5aad**:

Cutubkan waxaa lagu kordhiyey hal qodob iyo lix faqradood ayadoo la tirtirey laba qodob. Waxaa wadaxaajood ku socdaa laba qodob ilaa lix qodobna farsamo ahaan ayaa wax looga bedeley.




Khulaaso: Shax muujinaysa wax ka beddelka shanta cutub.




## 2.6. Soo-bandhigidda Warbixinta Soo-jeedinta Wax-ka-beddelka Dastuurka Guddiyada Joogtada ah ee labada Aqal.

Guddiga La socodku wuxuu u bandhigay Warbixinta Soo-jeedinta Wax-ka-Beddelka Dastuurka Guddoonka iyo Guddiga Joogtada ee Golaha Shacabka 30 August 2018 iyo Aqalka Sare 2 September 2018. Waxaana loo soo bandhigay 5ta cutub ee wax-ka-beddelka lagu sameeyey, tabta loo maray iyo natiijooyinka wax-ka-beddelka.

### 2.7. Daahfurka La tashiga Soojeedinta Waxkabaddelka Dastuurka.



Guddiga La socodku wuxuu qabtay kulan lagu daahfuray la tashiyada cutubyada dib-u-eegista lagu sameeyey, kaas oo ka dhacay Xarunta Maamul Gobaleedka Puntland Garowe 9,10 iyo 11 Oktoobar 2018. Waxaana kasoo qayb galay Guddoonka Barlamaaanada Dawlad Goboleedyada, xubnaha Madasha oo ay kala ah GMDHD, iyo Guddiyada Dastuurka ee Puntland, Jubbaland, Konfur Galbeed, Galmudug iyo Hirshabelle.

Intii uu Shirku socday waxaa Madasho aragtiyo ku dareen soo jeedinta wax ka beddelka cutubyada ayadoo si rasmi ah loo daahfurey in la bilaabo latashiyada wax ka beddelka cusub ee 5ta cutub.

### 2.8. Diyaarinta Cutubyada 6aad ilaa 9aad

Guddiga La socodka si waafaqsan Qodobka 133(5) wuxuu u diray 24 November 2018 GMDHD diyaarinta cutubyada 6aad ilaa 9aad si ugasoo shaqeeyaan cutubyadaas ayagoo raacaya tabta ku qeexan qaraarka Barlamaankii 9aad.

Guddiga Madaxabanaan wuxuu u soo gudbiyey 9 Janaayo, 2019 Guddiga La socodka cutubtayada 6aad ilaa 9aad ee dib-u-eegista lagu sameeyey, Guddiga La socodkuna wuxuu siiyey tilmaamo iyo sixid kadibna wuxuu ansixiyey 15kii bishii February,2019, waxayna hadda diyaar u yihiin Latashiga bulshada iyo Dawladda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyadaba.



### 2.8.1. Natiijooyinka Soojeedinta Wax-ka beddelka cutubyada 6-9aad

Wax-ka-beddelka lagu sameeyey cutubyada 6-9aad wuxuu noqon karaa: faqrad ama qodob cusub/kordhin, tirtirid iyo wax-ka-beddel farsamo.

**Cutubka 6aad**:


Shaxdan waxaa ay tilmaameysaa waxyaabaha laga bedeley cutubka 6aad. Cutubkan waxaa lagu soo kordhiyey 1 qodob iyo 32 farqadood oo cusub ayadoo la tirtirey 9 qodob iyo 6 faqradood.

Waxaa si ficaan loo kala saaray awoodaha labada Aqal ee Barlamaanka Federaalka iyadoo la caddeeyey habraaca sharci dejinta ee labada Aqal.





**Cutubka 7aad**: Waxaa lagu soo kordhiyey utubkan 7aad 2 qodob iyo 23 farqadood oo cusub ayadoo la tirtirey 3 qodob iyo 1 faqrad.

Cutubkan wuxuu abuurayaa axkaam cusub oo dastuurka KMG ah uusan ka hadlin.





**Cutubka 8aad**: Waxaa lagu soo kordhiyey cutubka 8aad 2 qodob iyo 18 farqadood oo cusub ayadoo la tirtirey 1 faqrad.

Cutubkani wuxuu nidaaminaya Golaha Wasiirada, ayadoo wax-ka-baddello muhiim ah lagu sameeyey qaab-dhismeedka, shuruudaha, awoodaha, magacaabista iyo xil-kaaqadista xubnaha Golaha Wasiirada, ayadoo si fiican loo kala saaray awooddii fulineed ee Madaxweynaha iyo Raysul-wasaaraha.



**Cutubka 9aad**: waxaa lagu soo kordhiyey 6 qodob iyo 13 farqadood oo cusub ayadoo la tirtirey 3 Qodob iyo 1 faqrad.


Guddigu wuxuu soojeediyey in la qaato nidaamka isku-dhafka ee maxkamaha midaysan, waxaana la qeexay Qaab-Dhismeedka Maxkamadaha Dalka ee heer-Federaal iyo heer Dawlad-goboleed. Ujeeddada soojeedintan ayaa ah in la helo masuuliyado ay wadaagayaan Xukuumadda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada oo la xiriira maamulka garsoorka iyadoo uu jirayo hal nidaam garsoor oo kaliya kaas oo maxkamadaha siinaya awoodo cad iyo habka loo qaadayo dacwadda iyo rafcaan-qaadashada.




### 2.8.2. Khulaasada Wax-ka beddelka cutubyada 6-9aad

Guud ahaan soojeedinta Wax-ka-beddelka cutubyada 6aad ilaa 9aa waxa lagu soo koobir kara sidatan:

- Qodobada cusub waa 11
- Faqradaha Cusub waa 86
- Qodobada la tirtiray waa 15
- Faqradaha laa tirtiray waa 9
- Qodobada Farsamo ahaan loo baddelay waa 43
- Qodobada aan waxba laga baddelin waa 2.



## 2.9. Diyaarinta Cutubyada 10aad, 11aad,13aa,14aad iyo 15aad

Guddiga La socodka si waafaqsan Qodobka 133(5) wuxuu u diray 18 Maarso 2019 GMDHD diyaarinta cutubyada 10aad, 11aad,13aa,14aad iyo 15aad si ay usoo diyaariyaan cutubyadaas ayagoo raacaya tilmaamaha uu siiyey Guddigu La socodka. Isla taariikhdaas, Guddigu wuxuu u diray Wasaaradda Arrimaha Dastuurka inay fududeyso Arrimaha u baahan wadaxaajoodka ee ku jira Cutubyadan gaar ahaan Qodobka 122aad ee ka hadlaya maamulka Maaliyadda Guud.

## 2.10. Diyaarinta Habraaca Ansixinta Cutubyada Dib-u-eegista Dastuurka.

Guddiga wuxuu diyaariyey Xeer-hoosaadka Habraaca Ansixinta Cutubyada Dib-u-eegista Dastuurka. Ujeedka Habraacan waa in uu tilmaamaa habka doodda iyo fadhiyada Xildhibaanada labada Aqal ee qodobada iyo cutubyada dib-u-eegista lagu sameeyey. Guddigu wuxuu usoo gudbinayaa labada Aqal si ay u ansixiyaan habraacan sida ugu dhakhsiyaha badan.

## 2.11. Hawl-wadeenada Cusub iyo La taliyeyaal ee Guddiga

Guddigu wuxuu shaqaalaysiiyey 10 hawlwadeeno iyo seddex La taliyeyaal Cusub kuwaas la shaqeen doona Guddiga si uu u guto loona dardargaliyo hawlaha dastuuriga ee Guddiga. Guddigu wuxuu shaqaalaha cusub siiyey tababaro kor loogu qaadayo aqoontooda iyo xirfaddooda la xiriirta dib-u-eegista dastuurka.

# 3.0. Korjoogteynta iyo Isku-dubaridka Geedi Socodka

Guddiga La socodka wuxuu korjoogteyn iyo isku-dabarid ku sameeyey hay'adaha ku shaqada leh arrimaha dastuurka sida hoos ku xusan:

## 3.1. Kulamo Seddex Geesood ah

Guddiga La socodka wuxuu u qabta kulan bille ah oo ay kasoo wada qayb galaan Wasaaradda Arrimaha Dastuurka iyo Guddiga Madaxabannaan, waxaana looga arrinsada horumarka laga sameeyey hannaanka dib-u-eegista dastuurka iyo caqabadaha imaan kara iyo xal u heliddoda iyo qorshayaasha soo socda.

## 3.2. Kulamada Madasha Guddiyada Dastuurka

Guddiga La socodku wuxu asaasay Madasha Guddiyada dastuurka ee heer federaal iyo heer dawlad-Goboleed si isku-dubarid loogu sameeyey hawlaha shaqo ee guddiyada dastuurka. Waxaa u qabsoomay seddex kulan ee Madasha Guddiyada Dastuurka oo looga arrin sanayo arrimaha Geedi-socodka dastuurka.

## 3.3. Kulanka Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee XFS

Guddigu wuxuu la yeeshay kulan Wasiirka, Wasiir Dawlaha iyo wasiir ku xigeenka Wasaaradda Arrimaha Gudaha 9kii August 2018 si loo korjoogteeyo hawlaha ay wasaaraddu ka shaqeenaysay ee fadaraalaynta iyo wadaxaajoodka siyaasadeed ee la xiriira dib-u-eegista Dastuurka gaar ahaan qodobadda 8aad,9aad iyo 54aad ee Dastuurka KMG.

### 3.4. Kulanka Guddiga Madaxabannaan ee Xuduuudaha iyo Arrimaha Federaalayta:

Guddigu wuxuu laba kulan oo kala duwan la yeeshay Guddiga Madaxabannaan ee xuduudaha 2dii August 2018 iyo 25kii May 2018. Guddiga La socodku wuxuu warbixinno kala duwan ka-dhagaystay Guddiga Madaxabannaan, wuxuu warbixin dhamaystiran ka bixiyey arrimaha xuduudaha. Labada Guddi ayaa is dhaafsadey aragtiyo muhiim u ah cutubyada iyo qodobada Dastuurka ee khuseeya Federaaleynta.

### 3.5. Kulamada Guddoonka iyo Guddiyada Joogtada ee Labada Aqal.

Guddiga La socodka wuxuu la kulmay Guddoomiyaha Golaha Shacabka 11 July 2018 si uu warbxin uga siiyo geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka. Sidoo kale, wuxuu kulamo kala duwan la qaatay Guddiga joogtada ee Golaha shacabka asagoo ugudbiyey warbixinno la xiriira dib-u-eegista dastuurka.

Guddigu waxaa uu sidoo kale xilliyo kala duwan kulamo la qaatey Guddoonka iyo Guddiga Joogtada ee Golaha Aqalka Sare.





### 3.6. Fadhiyada Guddiga La Socodka

Waxaa Guddiga warbixin xilliyeedkan u qabsoomay in ka badan 95 fadhi oo guddigu uu ka shaqeenayey hawlaha Dastuuriga ah ee loo igmaday, asagoo shaqeenayey xilliyada fasaxyada kala duwan ee xildhibaanada labada aqal.

## 4.0. La tashiyada

Si loo siiyo bulshada Soomaaliyeed fursado ay kaga qayb-galaan howlaha Dib-u-eegista Dastuurka Soomaaliya, Guddiga La socodku wuxuu u qabtay Dood-madaleed, kulamo la tashi iyo Aqoon iswaydaarsi:

- Dhalinyarada Soomaaliyeed: Guddigu wuxuu u qabtay dood-madalleed, kulamo kala duwan dhalinyara ku nool magaalooyinka Muqdisho,  Garowe iyo Baydhabo.
- Bulshada Rayidka: Guddiga wuxuu la qaatay kulama kala duwan hay'adaha Bulshada Rayidka ee magaalooyinka Muqdisho, Garowe, Baydhabo iyo Jowhar.
- Culumada Soomaaliyeed ee ku nool Muqdisho.
- Dadka Baahiyaha Gaarka ah leh ee ku nool Muqdisho.
- Kutlada Haweenka Golaha Aqalka Sare.
- Madaxda Dawlad Goboleedyada iyo Wasiirada Arrimaha Dastuurada:

Si loo helo wadaxaajood-siyaasadeed qaran oo ku saabsan hanaanka geedi socodka dib u eegista Dastuurka madaxda Dawladaha Xubnaha ka ah JFS, maamulada kamid ka ah JFS iyo daneeyeyaasha kale si loo xaqiijiyo daahfurnaanta lagama maarmaanka ah iyo hannaan loo dhanyahay, Guddigu wuxuu la yeeshay kulamo Madaxda  Dawlad-goboleedyada.

## 5.0. Qorshaha Guddiga

Guddiga la socodka oo si dar-dar leh kuwada howsha dib-u-eegista Dastuurka ayaa qorshayaashiisa dhow waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- La tashiga Dowlad-Gobleedyada iyo dadweynaha ee 10 ka dib-u-eegista lagu sameeyey.
- La tashiyada Guddiyada laba Aqal ee BFS.
- Wacyi-gelinta Dadweynaha ee la xiriirta Dib-u-eegista Dastuurka.
- Ugudbinta iyo ka-doodista 10ka Cutub ee dib-u-eegista Dastuurka, BFS.
- Dhamaystirka cutubyada 10aad,11aad,13aad,14aad iyo 15aad.
- Dabagalka arrimaha u baahan wadaxaajoodka siyaasadeed ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Xukuumadaha Dawladda Goboleedyada.
- Korjoogteynta iyo Isku-dubaridka hay'adaha la xiriira Geedi-socodka Dib-u-eegista Dastuurka heer Federaal iyo heer-dawlod-goboleed.

Qorshaha Guddiga waxaa kamid ah: La  tashiga Guddiyada laba Aqal ee BFS, Dowlad-Gobleedyada, iyo dadweynaha ee 10-ka cutub ee dib u eegista lagu sameeyay;

## 6.0. Caqabadaha Jira

Guddiga Dib-u- eegista iyo la socodka Hirgelinta Dastuurka  waxaa soo wajahay caqabado badan oo ay kamid yihiin:

6.1. Ergada Dawlad-goboleedyada ee ku biiri lahaa GMDHD:
Sida ku cad Qodobka 134aad ee Dastuurka KMG oo tilmaamaya in dawlad goboleed kasta oo Dawladda Federaalka ka tirsan ay soo dirsato 1 ergey oo ku biiraya GMDHD oo aan xukuumaddu wali aysan usoo gudbin Barlmaanka.

6.2. Khilaafaadkii Dawlad Goboleedyada iyo Dawladda Dhexe

Geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka waxaa saameyn ku yeeshay khilaafka soo kala dhex-galay dawladda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyada, ayadoo dib-u- dhac ku yimid dib-u-eegista Dastuurka.

6.3. Ayadoo aan wali lasoo dhamaystirin qaar kamid ah Qodobadii wadaxaajoodka (Qodobka 54aad iyo 122aad ) uga baahnaa Xukuumadda FS iyo xukuumadaha DXFS oo wali heshiis aan laga gaarin, taas oo dib u dhac ku keentay dib-u-eegista Dastuurka.

6.4. Caqabadaha dhanka Miisaaniyadii Qaranka ee 2018 iyo 2019 loo qoondeeyey dib u eegista Dastuurka oo aan loo helin sidii loogu talo-galay.

## 7.0. Talo-soo-jeedinta Guddiga

Guddigu wuxuu soo jeedinayaa tallooyinka soo socdka:

1. In Guddoonka labada aqal ka yeeshaan aragti midaysan arrimaha dib-u-eegista Dastuurka oo ah arrimaha hortabinta u leh Barlamaanka Federaalka Soomaaliya.
2. In labada Aqal ansixiyaan Habraaca Ansixinta Dastuurka si doodaha iyo ansixinta Baarlamaanka Federaalka u noqoto mid hufan oo waqtiga la jaanqaadi karta.
3. In XFS iyo Xukuumada Dawlad Goboleedyada ay ka fogaadaan khilaaf kasta oo ragaadin kara Geedi-socodka Dib-u-eegista Dastuurka si ay heshiis uga gaaran arrimaha wadaxaajoodka siyaasadeed u baahan gaar ahaan qodobada 54aad iyo 122aad sida u tilmaamayo Dastuurka KMG ah.
4. In si joogto ah loo bixiyo qoondada Miisaaniyada Qaranka ee Dib-u-eegista Dastuurka, isla markaasna lagu daro qoondo dhaqaale oo ku filan hawlaha Geedi-sosocdka dib-u-eegista Dastuurka xilliga Dib-u-eegista Miisaaniyada Qaranka June,2019.

## 8.0. Gabagabo

Waxaa guul-weyn laga gaaray geedi-socodka Dib-u-eegista Dastuurka ayadoo 10 cutub dib-u-eegis lagu sameeyey, halka cutubyada 10,11,13,14 iyo 15 ee Dastuurka ay ku socoto dib-u-eegis, lana dhammaystirayo bisha June, 2019.

Waxaan usoo gudbinaynaa Barlamaanka Federaalka Soomaaliya cutubyada dib-u-eegista lagu sameeyey si ay uga doodaan kalfadhiga 5aad ee hadda furmay, loona ansixyo kalfadhiga 6aad haddi ilaahay idmo.

Waxaan u mahadcelinaynaa dhammaan dadkii iyo hay'adihii bixiyey taageer siyaasadeed, dhaqaale iyo farsamo oo ay ku jiraan Madaxweynaha JFS, Guddoonka labada aqal, Raysul Wasaaraha XFS, Deeq-bixiye-yaasha Caalamka.

Waxaan ugu baaqayna dhammaan Madaxda JFS iyo Dawlad-goboleedyada in la kordhiyo taageerada siyaasdeed iyo dhaqaalaba si loo dhammaystiro Dib-u-eegita Dastuurka bisha Disamber,2019.

Haddaba, Guddiga La socodka wuxuu dadaal iyo waqti badan ku bixiyey sidii loo dhammaystiri lahaa Dastuurkan ayadoo ay jirto Caqabado badan. Haddii uu dhammaystirmo Dastuurkan waqtigii loo cayimay, waxaa sharaf weyn oo taariikhda Soomaaliyeed xusto u tahay Barlmaanka Federaalka, Guddoonkiisa iyo Madaxda Qaranka.

## 9.0. Lifaaqyada Warbixinta

1. **Lifaaqa**: Warqadda 1aad ee GMD loogu direy cutubyada 1aad ilaa 5aad.
2. **Lifaaqa**: Warqadda 1aad ee WAD loogu direy inay fududeyso wadaxaajoodka arrimaha siyaasadeed ee ku jira cutubyada 1aad ilaa 5aad.
3. **Lifaaqa**: Warqadda Labaad ee GMD loogu direy inay luuqad Dastuuri ah u bedelaan arrimaha wadaxaajoodka laga galey.
4. **Lifaaqa**: Warqadda saddexaad ee GMD loogu direy inay dib u eegis ku soo sameeyaan cutubyada 6aad ilaa 9aad.
5. **Lifaaqa**: Soo jeedinta Wax ka beddelka cutubyada 1aad ilaa 5aad ee Dastuurka KMG.
6. **Lifaaqa**: Qaraarka Habraaca Ansixinta Cutubyada Dastuurka.